DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 19AAD | CADADKA 12AAD | TAARIIKH: 24/12/2019 | Lam. 09 |
|---|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

# OFFICIAL GAZETTE

# الجريدة الرسمية

## SHARCIGA HAY'ADDA FOREENSIG SAYNISKA EE DOWLADA PUNTLAND

## TUSMADA


| | |
|---|---|
| Qeybta 1aad | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>***Ansixinta Xeerka Hay'adda Foreensig Sayniska ee Dowlada Puntland*** |
| Qeybta 2aad | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 3aad | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 4aad | Go'aanada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br>WAXBA MALEH |
| Qeybta 5aad | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br>WAXBA MALEH |

**Sharci Lr. 8 ee December 24, 2019, kuna saabsan Ansixinta Xeerka Hay'adda Foreensig Sayniska ee Dowaldda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland.**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80[aad]

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/153/2019, kuna taariikhaysan 16/12/2019.

**Markuu tixgeliyey:** Baahida loo qobo samaynta **Xeerka Hay'adda Foreensig Sayniska** ee Dowladda Puntland.

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1[aad]**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen **Xeerka Hay'adda Foreensig Sayniska** Dowladda Puntland.

**Qodobka 2[aad]**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda Puntland.

**Qodobka 3[aad]**

Dhaqan-gal Sharcigan wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

**Dr. Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

*Tix:-*XGGW/DPL/ 153/2019 Garoowe, Isniin Taariikh: 16/12/2019

**Ku: Madaxweynaha Dawladda Puntland** **Garoowe**

**Ujeeddo:- Ansixinta Xeerka Foreensig Sayniska Puntland.**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU:-**

**MARKUU ARKAY:-** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64**-aad.

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/524/2018 ee 27 August 2018, kuna saabsan soo gudbin Xeerka Cilmiga danbiyada Dawladda Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY:-** Baahida loo qabo Ansixinta Xeerka Foreensig Sayniska Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Dooddii iyo go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey kalfadhiga 45-aad Fadhigiisii 21-aad ee 08/12/2019 Xeerka foreensig Sayniska Puntland..

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Xeerka Foreensig Sayniska Puntland.**

Wada Shaqeyn Wacan

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND * OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

**Md. Abwaan Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**

## GOLAHA WAKIILLADA

## مجلس النواب

# XEERKA HAY'ADDA FOREENSIG SAYNISKA

---

## GAROOWE, PUNTLAND, SOOMAALIYA

### DECEMBER, 2019

## TUSMO


HORDHAC ........ 4
QAYBTA 1-AAD: QODOBBO GUUD ........ 5
Qodobka 1-aad ........ 5
Magaca, Ujeeddada iyo Baaxadda Xeerka ........ 5
Qodobka 2-aad ........ 5
Qeexid ........ 5
Qodobka 3-aad ........ 5
Ujeeddooyinka Hay'adda ........ 5
Qodobka 4-aad ........ 6
Shaqada Hay'adda ........ 6
QAYBTA 2-AAD ........ 6
AASAASIDDA, MADAX-BANNAANIDA, IYO AWOODAHA HAY'ADDA FOREENSIG SAYNISKA ........ 6
Qodobka 5-aad ........ 6
Aasaasidda Hay'adda ........ 6
Qodobka 6-aad ........ 7
Xarunta Hay'adda ........ 7
Qodobka 7-aad ........ 7
Madax Bannaanida Hay'adda ........ 7
Qodobka 8-aad ........ 7
Awoodaha iyo Waajibaadka Hay'adda ........ 7
QAYBTA 3-AAD ........ 8
SHAQAALAHA IYO GUDDIGA HAY'ADDA ........ 8
Qodobka 9-aad ........ 8
Qaab-dhismeedka Maamulka Hay'adda ........ 8
Qodobka 10-aad ........ 8
Xubnaha Guddiga Sare ee Kor-joogtaynta Hay'adda ........ 8
Qodobka 11-aad ........ 9
Shaqada iyo Mas'uuliyadaha Guddiga Sare ee Kor-joogtaynta ........ 9
Qodobka 12-aad ........ 9
Muddada Xil-haynta Guddiga Kor-joogtaynta Hay'adda ........ 9
Qodobka 13-aad ........ 10
Shirarka Guddiga Sare ee Kor-joogtaynta ........ 10
Qodobka 14-aad ........ 10
Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenka Hay'adda ........ 10
Qodobka 15-aad ........ 10
Shuruudaha lagu soo xulayo Guddoonka Hay'adda ........ 10
Qodobka 16-aad ........ 11
Awoodaha iyo Mas'uuliyadaha Guddoomiyaha Hay'adda ........ 11
Qodobka 17-aad ........ 12
Awoodaha iyo mas'uuliyadaha Guddoomiye Ku-xigeenka Hay'adda ........ 12
Qodobka 18-aad ........ 12
Asbaabaha Xil-waayista Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Hay'adda ........ 12
Qodobka 19-aad ........ 12

Magacaabista Shaqaalaha Sare ee Hay'adda ........ 12
Qodobka 20-aad ........ 13
Magacaabista Shaqaalaha Kale ee Hay'adda ........ 13
Qodobka 21-aad ........ 13
Shuruudaha Shaqaalaynta ........ 13
Qodobka 22-aad ........ 13
Xaqa iyo Waajibaadka Shaqada ........ 13
Qodobka 23-aad ........ 14
Dhowrista Shaqada iyo Xogta Hay'adda ........ 14
QAYBTA 4-AAD ........ 14
DHAQAALAHA & HANTIDA HAY'ADDA ........ 14
Qodobka 24-aad ........ 14
Dhaqaalaha Hay'adda ........ 14
Qodobka 25-aad ........ 14
Diiwaan-gelinta Hantida ........ 14
QAYBTA 5-AAD ........ 15
QODOBBO QUBANAYAAL AH ........ 15
Qodobka 26-aad ........ 15
Soo saarid Hab-raacyo ........ 15
Qodobka 27-aad ........ 15
Burin ........ 15
Qodobka 28-aad ........ 15
Dhaqan-galka Xeerka ........ 15

## HORDHAC

Xeerkani waxa uu dhisayaa Hay'adda Foreensig Sayniska ee Puntland, waxa uu sidoo kale dajinayaa awoodaheeda, shaqooyinkeeda, ujeeddooyinka hay'adda iyo arimaha ku xiran hay'adda ama kuwa ay dhici karto in ay xiriir la leeyihiin shaqadeeda.

# QAYBTA-1-AAD: QODOBBO GUUD

## Qodobka 1-aad
## Magaca, Ujeeddada iyo Baaxadda Xeerka

1. Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Hay'adda Foreensig Sayniska ee Puntland.
2. Ujeeddada Xeerkani waa in lagu dhiso Hay'adda Foreensing Sayniska ee Puntland.
3. Baaxadda xeerkani waxay ku baahsan tahay dhulka Puntland oo dhan. Hase yeeshee adeegga hay'adda foreensig Sayniska waxa ka faa'iidaysan kara guud ahaan Ummadda Soomaaliyeed.

## Qodobka 2-aad
## Qeexid

Xeerkan dhexdiisa, haddii aan si kale xeerku u tilmaamin macnaha erayadaan waxaa loola jeedaa sidan:

**Hay'ad:** waxaa loola jeedaa Hay'adda Foreensig Sayniska ee Puntland.
**Madaxweyne:** waxaa loola jeedaa Madaxweynaha Dawladda Puntland.
**Guddoomiye**: waxaa loola jeedaa qofka ugu sarreeya Hay'adda Foreensig Sayniska.
**Guddoomiye ku xigeen:** waxaa loola jeedaa qofka labaad ee ugu sarreeya Hay'adda Foreensig Sayniska.
**Golaha fulinta Dawladda Puntland:** waxaa loola jeedaa Golaha Wasiirrada ee Dawladda Puntland.
**Foreensig Saynis:** Waxaa loola jeedaa isticmaalka cilmiga sayniska iyo tiknoolajiyada si loo xalliyo kiisaska Ciqaabta ah iyo kuwa Madaniga ahba.

## Qodobka 3-aad
## Ujeeddooyinka Hay'adda

Ujeeddooyinka hay'adda waa:

1) Inay noqoto goobta bixisa adeegyada Foreensig Sayniska ee Puntland.
2) Inay noqoto goobta aqoonta iyo tababarrada Foreensig Sayniska ee Puntland.

## Qodobka 4-aad
## Shaqada Hay'adda

Shaqada hay’adda Foreensin Sayniska waa:

1. Hawlaha foreensig sayniska si loo xalliyo wixii kiisas ah ee xagga Ciqaabta iyo Madanigaba ah.
2. Inay diyaariso, baarto, kadbibna soo gudbiso caddaymaha la waydiistay ee Foreensig Sayniska ee la xiriira dacwadaha falalka dembiyada ama madaniga ah.
3. In ay bixiso talooyinka iyo sharraxaadda xagga Foreensig Sayniska ee lama huraanka u ah hay’adaha baarista iyo garsoorka.
4. In la xoojiyo isla markaana la dhiiri-geliyo kalsoonida bulshada ee xagga Foreensig Sayniska.
5. In la sameeyo Istiraatiijiyad buuxda ee lagu dhiirri-gelinayo Foreensig Sayniska ee Puntland iyo dhammaan Soomaaliya isla markaana loo sameeyo siyaasadaha iyo nidaamka lagu xoojinayo tayada daraasaynta Foreensig Sayniska, nidaamyada, baaritaannada, iyo qoritaannada natiijooyinka ee la siinayo Hay’adaha baarista iyo Garsoorka.
6. In la hubiyo xiriir qumman oo sugan ee u dhaxeeya Hay’adda Foreensig Sayniska, hay’adaha baarista iyo garsoorka ee Puntland iyo dhammaan Soomaaliya iyadoo kor loo qaadayo hubinta iyo ilaalinta tayada hawlaha Foreensig Sayniska.

# QAYBTA 2-AAD
# AASAASIDDA, MADAX-BANNAANIDA, IYO AWOODAHA HAY’ADDA FOREENSIG SAYNISKA

## Qodobka 5-aad
## Aasaasidda Hay'adda

Xeerkan waxaa lagu aasaasay Hay’ad lagu magacaabo Hay’adda Foreensig Sayniska ee Puntland.

## Qodobka 6-aad
## Xarunta Hay'adda

1. Xarunta Hay'addu waa magaalo madaxda Puntland ee Garoowe.

2. Hay'addu waxay ka hawl-geli kartaa dhammaan Gobollada iyo Degmooyinka Puntland.

## Qodobka 7-aad
## Madax-Bannaanida Hay'adda

Hay'addu waa mid u madaxbannaan shaqooyinkeeda lehna:

1. Shakhsiyad qaanuuneed, astaan iyo shaabbad u gaar ah.
2. Awood ay wax ku dacwayn karto laguna dacwayn karo.
3. Waxa ay heshiis la geli kartaa cid kasta si waafaqsan sharuucda Dawladda Puntland.
4. Waxay yeelan kartaa, hayn kartaa, iska iibin kartaa hanti ayada oo la raacayo Xeerarka wax iibsiga Dawladda Puntland.
5. Waxay soo saari kartaa, daabici kartaa, qaybin kartaa qoraallo cilmibaaris, qoraallo cilmiyeed, jariidado ama akhbaar kale ee ay u arki karto inay muhiim u tahay fulinta hawlaheeda.

## Qodobka 8-aad
## Awoodaha iyo Waajibaadka Hay'adda

Hay'addu waxay yeelan kartaa awoodaha soo socda:

1. Hayaddu iyadoo isticmaalaysa cilmiga Sayniska waxay baartaa wixii raad dembiyeed (sample) laga helay goobta dembigu ka dhacay kaasoo ay soo gudbiyeen hay'adaha sharci ahaan awoodda u leh.
2. Hay'addu iyadoo isticmaalaysa cilmiga sayniska waxay samayn kartaa baaritaanno kale ee aan la xiriirsanayn fal-dembiyeed sida sugidda hiddo-sidaha (genetics) ee carruurta la hubinayo waalidka dhalay.
3. Hay'addu waxay hubisaa in caddaymaha Foreensig Sayniska ee loo gudbinayo hay'adaha ku shaqada leh sida Hoggaanka Dembi Baarista iyo maxkamadaha ay sax yihiin isla markaana sugan yihiin.

4. Hay'addu waxay door muhiim ah ku yeelanaysaa qorshayaal lagu taageerayo manhaj mideysan ee foreensig sayniska, si loogu tayeeyo tababarrada la siinayo baarayaasha, xeer-ilaaliyeyaasha, garsoorayaasha iyo qareennada.
5. Hay'addu waxay diyaarisaa isla markaana ilaalisaa tayada adeegyada Foreensig sayniska ee loo gudbinayo hay'adaha baarista iyo garsoorka.
6. Hay'addu iyadoo la kaashanaysa wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee ay khusayso, waa inay samayso xeer iyo nidaam adag oo lagu kaydinayo xogta Foreensig sayniska gaar ahaan DNA-da, laguna siinayo oggolaansho cidda xogta arki karta, iyo ugu dambayn ciddii iyo habkii xogta lagula qaybsan lahaa dadka ay khusayso ee waddanka gudihiisa ama dibeddiisa.

## QAYBTA 3-AAD
## SHAQAALAHA IYO GUDDIGA HAY'ADDA

### Qodobka 9-aad
### Qaab-dhismeedka Maamulka Hay'adda

Hay'addu waxay ka kooban tahay qaybaha soo socda:

1. Guddiga sare ee kor-joogtaynta Hay'adda.
2. Guddiga fulinta hay'adda oo ay madax u yihiin Guddoomiyaha Hay'adda iyo ku xigeenkiisa.

### Qodobka 10-aad
### Xubnaha Guddiga Sare ee Kor-joogtaynta Hay'adda

1. Guddiga kor-joogtaynta Hay'adda Foreensig Sayniska waxa uu ka kooban yahay shan (5) xubnood.
2. Xubnaha oo ah mas'uuliyiin sare waxaa dhammaan soo magacaabaya xilkana ka qaadi kara Madaxweynaha Dawladda Puntland.
3. Xubnaha guddiga kor-joogtaynta oo noqon doona xubno xil sare haya waxay ka kala imaanayaan hay'adaha dawladda ee soo socda:
    b) Wasaaradda Caddaalada, Arrimaha Diinta, Dhaqan Celinta & Dastuurka.
    t) Wasaaradda Amniga iyo DDR-ta.

j) Wasaaradda Caafimaadka.

x)Wasaaradda Horumarinta Haweenka iyo Arrimaha Qoyska.

kh) Xeer-ilaalinta Guud.

4. Guddoomiyaha guddiga waxa iska dhex dooranaya xubnaha guddiga kor-joogtaynta hay'adda Foreensing Sayniska.

## Qodobka 11-aad
## Shaqada iyo Mas'uuliyadaha Guddiga Sare ee Kor-joogtaynta

Shaqada iyo masuuliyadda Guddiga sare ee kor-joogtaynta hay'adda waa:

b) Ka Talo siinta hay'adda qorshaha mustaqbalka dhow iyo midka fog.

t) Ka qayb qaadashada dhaqaale u raadinta hay'adda si ay u gaarto ujeeddooyinka ay hiigsanayso.

j) Ka caawinta hay'adda sare u qaadidda xiriirrada ay la leedahay hay'adaha maxalliga iyo kuwa caalamiga ah.

x) Kor-joogtaynta shaqada guud ee hay'adda si loo hubiyo u hoggaansanaanta xeerarka iyo Siyaasadaha hay'adda.

## Qodobka 12-aad
## Muddada Xil-haynta Guddiga Kor-joogtaynta Hay'adda

1. Xubnaha Guddiga waxay xilka hayn karaan muddo shan (5) sano ah.
2. Xubinnimada guddiga sare ee kor-joogtaynta waxaa loo soo magacaabayaa xubin kale haddii;

b) Ay dhammaato muddadii xil-haynta xubinta.

t) Ay xubintu keento iscasilaad qoraal ah xafiiska Madaxweynaha.

j) Ay geeri ku timaaddo xubinta.

x) Ay maxkamad awood leh ku xukunto dembi ciqaabtiisu ay ka badan tahay seddex (3) sano oo kama dambeys ah.

kh) Aanay xubnintu gudan karin waajibaadkeeda shaqo sabab kasta haku timaadee.

d) Ay xubintu ka maqnaato seddex fadhi oo isku xiga cudurdaar la'aan.

## Qodobka 13-aad
## Shirarka Guddiga Sare ee Kor-joogtaynta

1. Guddigu wuxuu kulmayaa seddexdii biloodba mar, iyagoo ku kulmaya meesha, wakhtiga iyo taariikhda uu soo jeediyay Guddoomiyaha Guddiga.
2. Sidoo kale Guddoomiyaha Guddigu wuu isugu yeeri karaa xubnaha guddiga haddii uu u arko lama huraan ayna jirto;

    b) Duruuf gaar ah oo ka dhigaysa lama huraan in guddigu kulan isugu yimaado.

    t) In seddex (3) ka mid ah guddiga sare ee kor-joogtaynta ku waydiistaan qoraal rasmi ah oo sababaysan in la qabto kulan gaar ah.

3. Guddoomiyaha Guddiga ayaa diyaarinaya ajandaha shirarka isaga oo ku wargalinaya dhammaan xubnaha guddiga mawduucyada shirka looga hadli doono.
4. Shirka guddiga kor-joogtaynta wuxuu ku qabsoomi karaa haddii ay goob-joog yihiin saddex (3) xubnood oo uu ku jiro Guddoomiyaha Guddigu.
5. Go'aannada guddigu waxay ku ansaxayaan cod hal-dheeri ah.
6. Haddii codadka xubnaha goob-joogga ah is le'ekaadaan waxaa la qaadanayaa dhanka uu u codeeyay Guddoomiyaha Guddiga kor-joogteynta.
7. Guddigu waxa uu yeelanayaa xoghaye aan cod lahayn.

## Qodobka 14-aad
## Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenka Hay'adda

Hay'addu waxay yeelanaysaa guddoomiye iyo guddoomiye ku xigeen uu soo magacaabayo xilkana ka qaadi karo Madaxweynaha Dawladda Puntland.

## Qodobka 15-aad
## Shuruudaha lagu soo xulayo Guddoonka Hay'adda

1. Guddoomiyaha hay'addu wuxuu yeelanayaa shuruudaha soo socda:

    b) Waa in uu yahay muwaadin reer Puntland ah.

    t) Waa in uu leeyahay dhaqan wanaagsan, daacadnimo, karti iyo xil gudasho.

    j) Waa in uusan gelin wax dembi ah 5tii sano ee ugu dambeysey.

x) Waa in uu yahay jaamici haysta shahaadada PhD oo la xiriirta cilmiga Foreensig Sayniska kana haystaa jaamacad la aqoonsan yahay.

kh) Waa in uu leeyahay khibrad shaqo oo shan (5) sano ah.

d) Waa in uu si fiican u yaqaan afka Soomaaliga.

2. Guddoomiye ku xigeenka hay'addu wuxuu yeelanayaa shuruudaha soo socda:
   b) Waa in uu yahay muwaadin reer Puntland ah.
   t) Waa in uu leeyahay dhaqan wanaagsan, daacadnimo, karti iyo xil-gudasho.
   j) Waa in uusan gelin wax dembi ah 5tii sano ee ugu dambeysey.
   x) Waa in uu yahay jaamici haysta shahaadada heerka labaad (Master Degree) la xiriirta cilmiga Foreensig Sayniska kana haystaa jaamacad la aqoonsan yahay.
   kh) Waa in uu leeyahay khibrad shaqo oo saddex (3) sano ah.
   d) Waa in uu si fiican u yaqaan afka Soomaaliga.

## Qodobka 16-aad
## Awoodaha iyo Mas'uuliyadaha Guddoomiyaha Hay'adda

Guddoomiyaha hay'addu waxuu yeelanayaa awoodaha iyo mas'uuliyadaha soo socda:

b) Waxa uu matalaa Hay'adda Foreensig Sayniska gudaha waddanka iyo dibeddaba.

t) Waxa uu guddoomiyaa dhammaan shirarka hay'adda.

j) Waxa uu u gudbiyaa sannadkiiba mar warbixinnada la xiriira shaqooyinka hay'adda Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-xigeenka iyo guddiga sare ee kor-joogtaynta ee hay'adda.

x) Waa inuu la socdo isla markaana qiimeeyo wax-qabadka hay'adda isagoo qaadaya tallaabooyinka ku habboon.

kh) Waa inuu Ilaaliyaa shaqooyinka maalinlaha ah ee Hay'adda Foreensig Sayniska.

## Qodobka 17-aad
## Awoodaha iyo mas'uuliyadaha Guddoomiye Ku-xigeenka Hay'adda

1. Wuxuu si joogto ah uga caawinayaa Guddoomiyaha hawlaha Hay'adda.
2. Wuxuu yeelanayaa awoodaha iyo mas'uuliyadaha guddoomiyaha Hay'adda marka uu guddoomiyuhu ka maqan yahay dalka.
3. Wuxuu qabtaa shaqooyinka iyo hawlaha uu gudoomiyaha hay'addu si gaar ah ugu wakiisho.
4. Haddii Guddoomiyuhu dhinto, is casilo ama xilka laga qaado, guddoomiye ku-xigeenka ayaa si ku meel-gaar ah u qabanaya xilka guddoomiyaha hay'adda inta laga soo magacaabayo guddoomiye cusub.

## Qodobka 18-aad
## Asbaabaha Xil-waayista Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Hay'adda

Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenku waxa ay xilka ku waayi karaan haddii:

b) Ay keenaan iscasilaad qoraal ah oo uu Madaxweynuhuna ka aqbalo.
t) Ku kacaan khiyaano qaran.
j) Ku takri falaan dhaqaalaha iyo awoodaha hay'adda.
x) Ay geeri ku timaaddo.
kh) Ay maxkamad awood u-leh ku xukunto dembi ciqaab ah oo kama dambays ah.
d) Aysan gudan karin waajibaadkooda shaqo caafimaad-darro awgeed.

## Qodobka 19-aad
## Magacaabista Shaqaalaha Sare ee Hay'adda

1. Haddii ay habboonaato hay'addu waxay yeelan kartaa qaybo kala duwan oo fuliya hawlaheeda.
2. Qayb kasta oo ka mid ah qaybaha hay'adda waxay yeelanaysaa madax-qaybeed lagu soo xuli doono sida uu qabo sharciga shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda Puntland.

3. Dhammaan qaybaybaha shaqaalaha ee hay'addu waxay hoos imaanayaan xagga shaqada Guddoomiyaha Hay'adda Foreensig Sayniska.
4. Madax-qaybeed kasta waa in laga helo shuruudaha soo socda:

   b) Waa in uu haystaa shahaadada heerka koowaad (Bachelor Degree) kana haystaa jaamacad la aqoonsan yahay.
   t) Waa in uu leeyahay Khibrad dhan labo (2) sano.
   j) Waa in uu si fiican u yaqaan afka Soomaaliga iyo Ingiriiska.

## Qodobka 20-aad
## Magacaabista Shaqaalaha Kale ee Hay'adda

1. Hay'addu waa in ay yeelataa xoghaye iyo shaqaale kale oo wax ka fududeeya shaqada hay'adda.
2. Dhammaan shaqaalaha hay'adda waxaa lagu qorayaa laguna hawl-gelinayaa sida ay qabaan xeerka iyo xeer-nidaamiyaha shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda Puntland.
3. Xoghayaha iyo shaqaalaha kaleba waxay maamul ahaan hoos imaanayaan Guddoomiyaha hay'adda waxayna shaqadooda caadiga ah ka sokow fulinayaan dhammaan tilmaamaha shaqo oo uu siiyo Guddoomiyaha Hay'adda Foreensig Sayniska.

## Qodobka 21-aad
## Shuruudaha Shaqaalaynta

Dhammaan qof kasta oo ka mid noqonaya shaqaalaha hay'adda ee ku xusan Qodobada **15-aad, 19-aad iyo 20-aad** waa inuu ka haystaa warqadaha dembi la'aanta iyo hufnaanta xagga xog-ilaalinta hay'adaha ku shaqada leh.

## Qodobka 22-aad
## Xaqa iyo Waajibaadka Shaqada

Dhammaan hawl-wadeennada iyo shaqaalaha kale ee ka haw-lgala Hay'adda Foreensig Sayniska waxay la xaquuq iyo waajib shaqo gudasho la mid noqonayaan shaqaalaha kale ee dawladda gaar ahaan xagga waqtiga shaqada iyo fasaxyada.

## Qodobka 23-aad
## Dhowrista Shaqada iyo Xogta Hay'adda

Qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha hay'addan waa inuu:

b) Si daacad ah uu u qabto shaqada uu u-xil-saaran yahay ka miro dhalinteeda.

t) Qabto hawl kasta oo madaxda ka sarraysa u dirto khusaysana shaqada hay'adda.

j) Dhawro waqtiga shaqada hay'adda.

x) Si adag u xafido xogta iyo sirta hay'adda inta uu u socda xiriirka shaqada iyo markuu dhammaadaba.

kh) Xubintii lagu helo in ay bixisay ama ku xad-gudubtay sirta iyo xogta hay'adda iyadoo shaqaale ah amaba shaqadii ka dhammaatay, waxaa lagu dabaqayaa ciqaabaha ku xusan "Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed."

# QAYBTA 4-AAD
# DHAQAALAHA & HANTIDA HAY'ADDA

## Qodobka 24-aad
## Dhaqaalaha Hay'adda

Dhaqaalaha Hay'adda Foreensig Sayniska ee Dawladda Puntland wuxuu ka imaan karaa:

b) Dhaqaalaha looga qoondeeyo miisaaniyadda dawladda Puntland.

t) Kaalmada ay ka hesho hay'adaha caalamiga ah, deeq bixiyayaasha, iyo ururrada waddaniga ah.

j) Kaalmada ay ugu deeqaan qurba-joogtu iyo gancsatada gudaha.

## Qodobka 25-aad
## Diiwaan-gelinta Hantida

Hay'adda Foreensig Sayniska waa inay magaca hay'adda ku diiwaan gelisaa dhammaan hantida ay leedahay sida dhulka, dhismayaasha, gaadiidka, qalabka xafiisyada iyo shaybaaradda iyo waxii soo raaca, isla markaasna waa in loo

maamulo loona isticmaalo hantida hay'adda si waafaqsan xeerarka hantida Dawladda Puntland.

## QAYBTA 5-AAD
## QODOBBO QUBANAYAAL AH

### Qodobka 26-aad
### Soo saarid Hab-raacyo

Guddoomiyaha Hay'adda Foreensig Sayniska waxuu soo saari karaa wareegtooyin, tusaalooyin, tilmaamo iyo hab-raacyo lagu hagayo laguna xoojinayo habsami u socodka hawlaha hay'adda isla markaasna lagu baraarujinayo hawl-qabadka shaqaalaha hay'adda.

### Qodobka 27-aad
### Burin

Waxaa la baabi'iyey xeer iyo amar kasta oo aan la socon karin xeerkan Hay'adda Foreensig Sayniska.

### Qodobka 28-aad

### Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkan waxa uu dhaqan gelayaa marka uu Golaha wakiillada Puntland ansixiyo, uuna saxiixo Madaxweynaha Dawladda Puntland, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.